# Heyb Sooc Ku Dhisan Midabka, Qowmiyadda ama Halka Qofku Ka Soo Jeedo

*Ka baro xog dheeraad ah xaqa aad u leedahay in laguu geysan heyb sooc ku dhisan midabka, qormiyadda, ama halka aad asal ahaan ka soo jeedo iyo xaq dhawrka sharcigu ku siinayo*

**Sidee ayuu u egyahay Heyb Sooc Ku Dhisan Midabka, Qowmiyadda ama Halka Qofku Ka Soo Jeedo?**

**Dulmar Guud**

Sharciga ma waafaqsana in qofka lagu sameeyo heyb sooc ama shirkad ay si bareer ah ula dhaqanto si ka duwan sida dadka kale taasoo ku saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu asal ahaan ka soo jeedo. Tusaale ahaan, mulkiilaha ayaa jabiyey sharciga kirada guryaha wuxuuna ku dooday inuusan ka kireyneyn dadka madowga ah gurigiisa. Sidoo kale, waa sharci daro in loo shaqeeye diido inuusan shaqada qoreyn dadka midabka leh taasoo ku sleysan midabka,qowmiyadda iyo halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan.

Qaar ka mid ah hababka kala duwan ee heyb sooca oo qarsoon ayaa jira. Tusaale ahaan, goobaha shaqada, kireeyayaasha iyo deyn bixiyayaasha ayaa laga yaabaa in ay soo saaraan xeerar si aan cudurdaar laheyn ama aan loo sineyn u dhaawacaya qowmiyad gaar ah ama meel kaliya ka soo jeeda. Tusaale ahaan, in shaqada aan la qorin qof kasta oo horey u galay nooc gaar ah oo ka mid ah fal dambiyeedka waxa ay si gaar ah u dhaawaceysaa dadka madow ama laatiinka ah ee codsanaya shaqada, oo laga yaabo in dambiyada noocaas ah ay kaga badan yihiin dadka caddaanka ah. Qaar ka mid ah fal dambiyeedka, gaar ahaan kuwa xilli hore ahaa, waxba kama bedeleyso sida qofka shaqada u qabto. nidaam si gaar ah loola beegsado nooc ka mid ah faldambiyeedka waa sharci daro « saameyn culus ku reebaya » dad gaar ah.. Waxaa intaa dheer, sababta loo sameeyey in la cadeyn karo in loola jeedo in si gaar ah loogu dhibaateeyo dadka midabka leh ee horey u galay fal dambiyeed gaar ah, xaaladdaas oo sharcigan uu noqonayo mid sharci daro ah oo si bareer ah heyb sooc ugu geysanaya dad gaar ah.

**Xuquuqdaada:**

- Sharciyada ka hortagga heyb sooca ee dawladda dhexe waxa ay mamnuucayaan heyb sooc loogu geysto dadka kirada, deyn qaadashada iyo shaqada ee goobaha dadaweynaha u furan sida maqaayadaha, shineemooyinka, goobaha lagu madadaasho iyo tareenada.
- Looguma diido karo in lagaa kireeyo guri, shaqo ama adeeg kale oo u furan dadweynaha midabkaaga, qowmiyadaada ama halka aad ka soo jeedo asal ahaan sidoo kale, lagaama qaadi karo sicir ka duwan kan dadka kale midabkaaga, qowmiyadaada ama halka aad ka soo jeedo asal ahaan darteed.
- Dastuurku waxa uu dawladda ka mamnuucayaa in si xun laguula dhaqmo midabkaaga, qowmiyadaada ama halka aad ka soo jeedo asal ahaan darteed.
- Sharciyada gobolka iyo kuwa degaanka ayaa ilaalinaya in aad dadka lagusameyn heyb sooc ku dhisan midabka, qowmiyadda ama halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan.

**Maxaad sameyneysaa hadii aad aaminsan tahay in xuquuqdaas lagu xad gudbay**

- Ururi dhamaan waxyaabaha caddeynta u noqon kara cabashadaada — tusaale ahaan iimeyl, fariin qoraal ah, codsiyada aad buuxisay — iyo dadka markhaati kaaga noqon kara heyb sooca laguu geystay.
- Ku qor sida ay isugu xigeen dhacdooyinka iyo dhamaan waxyaabaha kugu dhaliyey in heyb sooc laguu geystay.
- Waa in aad cadeyn kartaa in heyb sooc bareer ah laguu geystay adiga oo muujinaya dadka aan kula wadaagin midabka, qowmiyadda iyo halka aad asaal ahaan ka soo jeedo oo guryaha ama goobaha shaqada loola dhaqmay si ka diwan sida laguula dhaqmay.
- Isku day in aad ogaato hay'adaha dawladda ee aad cabashadaada u gudbineyso. Tani waa mid dhalin karta jahwareer waayo waxaa jira hay'ado dawladda dhexe, gobol, iyo kuwa degaanka ah oo laga yaabo in ay ku caawin karaan taasoo ku xiran halka aad ku nooshahay. Ka bilow boggaga internetka ee hay'adaha dawladda dhexe: guriyeynta, Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Mareykanka, xaga shaqada, Gudiga U sinaashaha Shaqada; deyn bixinta macaamiisha, Xafiiska Iaalinta Xuquuqda Maaliyadeed.
- Waxaa kale oo suurogal ah in magaaladaadu leedahay xafiis u qaabilsan xuquuqda aadanaha oo ku caawin kara.
- Hay'dahan waxa ay ku weydiinayaan in aad soo gudbiso faahfaahin ku saabsan cabashadaada adiga oo soo raacinaya wixii qoraal ah ee taageeraya iyaga oo sameeya baaritaan aan lacag lagaa qaadeyn. Waa in aad ogaataa in mudada laguu qabto noqon karto mid yar. Waxa ay tani noqon kartaa in lacag magdhaw ah lagu siiyo ama fursad shaqada ah dib laguugu celiyo ama la xaliyo arrintii guryaha ee aad ka cabatay, iyada oo shaqada ama guryaha lagu qasbo in ay wax ka bedelaan sharciyadooda.
- Waxa kale oo aad ka fikiri kartaa in aad dacwad ka furto maxkamadaha gobolka ama dawladda dhexe.

**Suurogal ma tahay in layga aargoosto marka aan cabasho diiwaan geliyo?**

- Qoraal ka samee talaabo kasta oo kireeyaha ama loo shaqeeyaha qaado ka dib marka ay ogaadaan in aad dacwad liddi ku ah ka diiwaan gelisay maxkamadda. Waxaa suurogal ah in ay taasi liddi ku tahay Qodobka Koowaad ee Dastuurka oo sharcigu diidayo aargoosashada.
- Haddii ay taasi dhacdo, waxa aad u soo gudbin kartaa hay'adaha ku shaqada leh aargoosiga ama waxa aad wax ka bedeli kartaa cabashada oo aad ku dari karto.

**Goobo kale oo dheeraad ah**

**<u>Heyb Sooc Ku Dhisan Midabka, Qowmiyadda ama Halka Qofku Ka Soo Jeedo ee Shaqada</u>**

**Xuquuqdaada:**

- Laguuguma diidi karo shaqo, fursad ama dalacsiin ku saleysan midabkaaga, qowmiyadaada ama halka aad ka soo jeedo asal ahaan.
- Tusaale ahaan heyb sooca aan sharciga aheyn ee U Sinaashaha Shaqada ee Dawladda Dhexe waxaa ka mid ah go'aan kasta oo loo shaqeeyaha uu ku diido inuu qoro shaqada oo ku xiro shuruudo ku dhisan midabka, qowmiyadda iyo halka ay asal ahaan ka soo jeedaan dadka soo codsanaya. Waxaa kale oo ka mid noqon kara talaabooyin kale oo uu qaado oo shuruudo uu ku

xiro qoroshada shaqaalaha laakiin aan shaqada wax xiriir ah laheyn kuna saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka ay asal ahaan ka soo jeedaan dadka soo codsanaya.
- Dastuurku waxa uu dawladda ka mamnuucayaa in si xun laguula dhaqmo midabkaaga, qowmiyadaada ama halka aad ka soo jeedo asal ahaan darteed.

**<u>Heyb sooc ku dhisan midabka, qowmiyadda ama halka qofku ka soo jeedo ee guryaha</u>**

**Tusaalooyin heyb sooc ku dhisan midabka, qowmiyadda ama halka qofku ka soo jeedo ee guryaha**

- Haddii aad codsato in aad kireysato ama iibsato guri oo laguu sheego in guryaha aan laga kireyneyn ama iibineyn dadka madow.
- Kireeyayaasha iyo deyn bixiyayaasha ayaa laga yaabaa in ay soo saaraan xeerar si aan cudurdaar laheyn ama aan loo sineyn u dhaawacaya qowmiyad gaar ah ama meel kaliya ka soo jeeda. Tusaale ahaan, haddii la diido codsigaaga deynta waayo qowmiyadaada darteed ama hay'addu diido in ay deyn ku siiso ama ceymisku diido waayo guriga ayaa ku yaal xaafad gaar ah ama ceymiska aan lagu siin qodobo lamid ah kuwa lagu siiyo dadka kale ee la midka ah.

**Xuquuqdaada:**

- Sharciga Helitaanka iyo Qeybinta Guryaha ee dadka u siman yahay waxa uu mamnuucayaa heybsooca kirada iyo deynta. Sharciga u Sinaashaha Deyn Qaadashada waxa uu mamnuucayaa heyb sooca deynta. Labada sharciba waxa ay mamnuucayaan heyb sooca ku dhisan midabka, qowmiyadda iyo halka qofku ka soo jeedo asal ahaan.
- Sharciyada ilaalinta xuquuqda aadanaha ee gobolka iyo kuwa degaanka ayaa mamnuucaya heyb sooca guryaha.

**<u>Heyb Sooc Ku Dhisan Midabka, Qowmiyadda ama Halka Qofku Ka Soo Jeedo ee dugsiyada iyo kuliyadaha</u>**

**Tusaalooyin heyb sooca dugsiyada iyo xeryaha kuliyadaha**

- Kala saarista fasalada ama xafladaha ay dugsiyadu qabtaan oo ku dhisan heyb sooc midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahan ka soo jeedo.
- Adeegga luqadaha ee dadka baranaya afka Ingiriisiga.
    - Ciqaab loo geysto koox ardayda ka mid ah oo ku saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.
    - Adeeg kala duwan oo loo qabto taasoo ku saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.
- Qashqashaad ama faduul loo geysto kuna saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.
- Ardayda oo bar tilmaameed looga dhigto kuna saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.

**Xuquuqdaada:**

- Sida uu dhigayo sharciga VI ee Sharciga Madaniga, waxa uu mamnuucayaa heyb soo ku dhisan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan looguna diido barnaamijyada

iyo adeegga dadaweynaha. Taas waxaa ka mid ah adeegga dugsiyada iyo kuliyadaha gargaarka ka hela Wasaaradda Waxbarashada ee  Mareykanka (Fiiro gaar ah: qaar ka mid ah dugsiyada gaarka ah lama siiyo gargaarka dawladda dhexe, sidaa darteed Sharciga VI ma khuseeyo).

- Goobta waxbarashada ee aad dhigato waa in ay ka jawaabaan xaaladaha heyb sooca ah ama qashqashaadda ah ee ku saleysan midabka, qowmiyadda, iyo halka qofku ka soo jeedo qof ahaan ee laguugu diido in aad ka qeyb qaadato ama aad ka faa’iideysato barnaamijyada waxbarashada iyo dhaqdhaqaaqa la xiriira.